



## Laboratory Services

## Abuur Ukun Saxaro iyo Deris-ku-nool Fariimo Ururin Saxaro

**Waxyaabaha ku jira dhalooyinka ururinta waa SUN – Ka fogee caruurta yaryar.**

### Fariimo:

1. Ururinta, waxa lagu siiyay waxyaabahan soo socda:
  - Koofiyad ururin saambal
  - Ukun & Deris-ku-nool (Para Pak Kit – dhalo fur cas iyo dhalo fur cawlan)
  - Abuur Saxaro (Fecal Enteric Plus – dhalo fur cagaaran)
  - Mariye loox ah
  - Waraaq fariimo
2. **Ku qor** dhalooyinka **magacaaga hore iyo ka dambe, taariikhdaada dhalasho iyo taariikhda iyo wakhtiga ururinta.**
3. Sare u qaad sal-saarka musqusha oo koofiyadda ururinta saar qarka musqusha (iyada oo dhinaca qaloocon u jeedo xagga dambe ee musqusha).
4. Deji sal-saarka musqusha, si uu koofiyadda ururinta meesha ugu xejayo. Ku saxarood ama xaar ku rid koofiyadda. Waa in saambalka saxarada aanay la socon kaadi ama waraaq musqul.
5. Adiga oo isticmaalaya mariye loox ah ama qaadooyinka ururinta ee ku dhejisan furka dhalo kasta (ha isku darin qaadooyinka ururinta ee dhalooyin kala duwan), ka soo qaad qaddar ah saxaro meelaha u muuqda inay leeyihiin dhiig, xab ama ah biyo-biyo. Haddii saxaradu qaab leedahay (adag tahay), ka soo qaad qaddaro yaryar dhammaad kasta iyo dhexda.
6. Ku rid saambalka weelka illaa waxa ku jira ay sare u kacaan illaa **XARIIQDA CAS** ee ku taala waraaqda ku dhegsan weel kasta. Marka aad saambal ku ridid weel kasta, si adag u xidh dhalooyinka, ka dibna si xoogan u rux dhalo kasta illaa waxa ku jira si fiican isugu walaaqmaan.
7. Si dhammeystiran u dhaq gacmaha. Haddii wax hoore ah oo ku jira weelka ay soo gaadhaan maqaarkaaga ama indhahaaga, ka raaci biyo badan.
8. Marka ururinta saamballadu dhammaato, ku hay dhalooyinka heerkulka qolka oo gudaha **72 saacadood** ku keen shaybaadhka.

